

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Hadii ilmehaagu xanuunsado

La xidhiidh xarunta gargaarka degdaga ee carruurta ee 0470588300 hadii ilmehaagu uu aad u xanuunsado ama aad u dhaawacmo una baahan yahey daaweyn cosbitaal oo kadis ah, ama wac xafiiska isku-xidhka ee 5880 00. Hadii ambulaas loo baahdo, wac 112.

Sidan ayaad ku helaysaa halkaa:

Gargaarka degdaga carruurta waxay ku taalaa dabaqa 6-aad ee guriga-T da (T-huset).

Gargaarka degdaga carruurta waxaad ka soo gali kartaa Värendsgatan. U jeedso dhinaca Centrallasarettet oo soo gal xadiiqada baarkinka ee midig. Halkaa waxa aad ka helaysaa ilin ay ku qorantahey "Barnakut". Kor u fuul dabaga 6.

Gargaarka degdaga carruurta waxaad ka helaysaa haben iyo maalin telefoonka 0470-58 83 00, 58 80 00 växel.

Hadii aad ambalaans u baahan tahey, wac 112.

Ciyaadada carruurta- iyo dhalinyarada, Växjö

La kulanka wakhti la qabsadey, wakhti qabsashada iyo talo bixinta.
Telefoon 0470-58 84 50

Rugta daaweynta carruurta- iyo dhalinyarada, Ljungby

Telefoon 0372-58 53 60

Wada hadalka degdaga xiliyada kale 0372-58 50 00

Talo bixinta

Dhibaatooyinka cuntada iyo dhibatooyinka kale ee cunugyada- iyo carruurta sii yaryar, la xidhiidh rugta caafimaadka carruurta.

Talo bixinta iyo daryeelka carruurta bukaanka ah waxa aad marka hore la xidhiidhi rugta caafimaadka. Waxa kale oo aad soo wici kartaa habeen iyo maalin Talo bixinta daryeelka bukaanka ee lambarka telefoonka 1177.